

Wargeyska Mountain View

Diseembar 14, 2016

Isniin, Diseembar 12 - Diseembar 16...Carwada Buugga, Maktabka

Talaado, Diseembar 20.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC @ 8:15

Qamiis, Diseembar 22.....Shirka Heesaha Ardayga, Gym @2:00

Jimco, Diseembar 23.....Riwaayadda Ardayda u Dhigto Waalidiinta, Gym @8:30

Jimco, Diseembar 23.....Sii Deynta Ardayda 12:40

Isniin, Diseembar 26 - Janaayo 8.....Ma Jiro Dugsi

Isniin, Janaayo 9.....Resumeeyada Dugsiga

Fariinta Agaasimaha

Dugsiga Mountain View, waxaan ka walwalnaa ammaanka dhamaan ardayda iyo shaqaalaha. Waxaan halkaan u joognaa in aan waxbarano, waxbarashadana waxay wanaagsan tahay marka ardayda iyo shaqaalaha dareensan yahiiin nabad geliyo, jir ahaan iyo caatifad ahaan, labadaba. Waxaan codsaneynaa in dhamaan martida soo booqata dugsiga iska xaadiriyaan xafiiska ka hor inta aysan u gudbin meelaha ardayda joogto ama aysan xariir la sameynin ardayda.

Hal arrin ay dhamaan dugsiyada qabaan waa gardareysiga. Sida aan u sifeyno, gardareysiga waxaa ka mid ah saddax shay. Marka kowaad, qof ayaa iskudaya in uu sabab u noqdo in uu waxyeelo u geysto dad kale, jir ahaan ama caatifad ahaan. Marka labaad, waxaa jira kala duwanaa xagga quwadda oo ka dhexeyso qofka sababta u ah waxyeelada iyo dhibanaha. Marka saddaxaad, waa marka qofka uu geysto gaf ama gafaf la mid ah.

Ka hortagga ugu weyn ee lagu sameeyo gardareysiga waa in dadka u sheegaan madaxda waxa meesha ka socda. Marka ardayda u sheegto qof weyn, dugsiga wuxuu awood u yeeshaa in la hubiyo in gardareysiga uusan sii soconin. Waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad caruurtaada kala hadashid in ay u sheegaan dadka waaweyn marka loo geysto waxyeelo inta ay ku sugan yahiiin dugsiga.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Diseembar 20, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Carwada Buugga Dugsiga

Todobaadkaan, waxaan gudaha maktabka ku qaban doonaa carwada buugga Waxbarashada. Tani waa fursad sare oo lagu helo dhowr buugaag fiican waqtiga Christmas ama si caruurtaada

u helaan wax ay akhristaan waqtiga fasaxa. Carwada buugga waxaa la furi doonaa 3:15 ilaa 5:00 maalin kasta, marka laga reebo Arbacada. Maalinta Arbacada, waxay furnaan doontaa saacado dheer ilaa 7:00. Mahadsanid, Miss Bundy, sida aad u diyaarisay carwada buugaagta.